

واجب المعلم والمتعلم

Waajibka macallinka iyo ardayga

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa weyn ku yiri:

{يَرْفَعُ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا مِنْكُمْ وَالَّذِينَ أُوتُوا الْعِلْمَ دَرَجَاتٍ وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ}

(Ilaahay wuxuu kor yeelayaa kuwa xaqa rumeeyay iyo kuwa cilmiga leh daragooyin Allana waxa aad sameynaysaan waa og yahay)

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago ahna mid cilmi iyo xigmad badan.

Waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa oo ah nabiga ummiga ah oo sharafta badan, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa oo ifaya oo barakaysan, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Intaas kaddib:

Waxaa nasoo foodsaaran sannad dugsiyeed cusub, waxaan weyddiinaynaa Ilaahay - cazza wajalla - inuu

noqdo sannad dadaal leh iyo mid guul u ah ilmaheena dhammaan, waxaan shaki ku jirin in islaamka uu siiyay aqoonta mudnaan weyn iyo daryeel gaar ah, waa nolosha quluubta, waa nalka aragga, maxaayeelay cilmiga wuxuu gaarsiiyaa qofka darajada dadka qiimaha leh, iyo darajooyin sarsare adduun iyo aakhiraba, isagaa lagu xiriiriyaa qaraabada isagaana lagu gartaa xalaal iyo xaaraan, Ilaahay dad ayuu ku koryeela khayrkana wuu galiyaa iyagoo hoggaamiyeyaal ah iyo imaamyo, oo raadadkoodada wax laga qaato falalkoodana lagu daydo, wuxuu yiri Alle:

{قُلْ هَلْ يَسْتَوِي الَّذِينَ يَعْلَمُونَ وَالَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ} .

(Dheh nabiyow ma siman yihiin kuwa wax yaqaanna iyo kuwa wax aan aqoonin)

Daryeelka uu siiyay islaamka cilmiga iyo ku boorintiisa wuxuu la socday aayadaha ugu horreeya quraanka xakiimka ka mid ah ee soo dega, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah - subxaanau wataacaalaa- :

{اقْرَأْ بِاسْمِ رَبِّكَ الَّذِي خَلَقَ * خَلَقَ الْإِنْسَانَ مِنْ عَلَقٍ * اقْرَأْ وَرَبُّكَ الْأَكْرَمُ * الَّذِي عَلَّمَ بِالْقَلَمِ * عَلَّمَ الْإِنْسَانَ مَا لَمْ يَعْلَمْ}

(Wax ku akhri Nabiyow magaca rabbigaaga ee abuuray (khaliqiga) * aadanahana ka abuuray xinjir *akhri rabbigaaga waa kan sharafta leh * ee baray sida

qalinka wax loogu qoro * aadanaha baray waxuuna aqoonin), waxyiga waxa ugu horreeya soo dego waa in lays amro akhrinta, taasoo ah albaabada aqoonta ugu horreeya, kaddib waxaa la tilmaamayaa qalinka oo ah qalabka cilmiga lagu qoro laguna guuriyo, waxaa ugu sugan arrinkan dadka oo dhan baraarujin lagu baraarujinayo fadliga cilmiga iyo in laysku boorriyo raadintiisa.

Cilmiga wuxuu leeyahay meel weyn, dadka aqoonta lehna waxay leeyihiin darajadooda sare, haddii uusan jiri lahayn cilmiga iyo culimada dadka way lumi lahaayeen, cilmiga waa nuur qofka ku arkayo dhabta, culimada dadka waxay u yihiin sida xiddigaha cirka ku sugan oo kale oo lagu iftiinsado, wuxuu yiri Alle:

{ أَفَمَنْ يَعْلَمُ أَنَّمَا أُنزِلَ إِلَيْكَ مِنْ رَبِّكَ الْحَقُّ كَمَنْ هُوَ أَعْمَىٰ إِنَّمَا يَتَذَكَّرُ أُولُو الْأَلْبَابِ }

(Qof og in waxa lagaaga soo dejiyay xagga rabbigaaga uu xaq yahay ma la midbaa mid indho la', waxaa uun waanada qaata kuwa caqliga leh)

Aayaddan Ilaahay dadka wuxuu ugu qeybiyay labo qeybood: aqoonyahan iyo indhoole, cilmiga wuxuu ka horgeeyay indhoolanimada, aragga halkan waxaa laga wadaa aqoonta ogaanshaha ee ma aha aragga indhaha, wuxuu yiri Alle:

{فَإِنَّهَا لَا تَعْمَى الْأَبْصَارُ وَلَكِنْ تَعْمَى الْقُلُوبُ الَّتِي فِي الصُّدُورِ}

(Aragga ma indhabeelo laakin waxaa indhabeela quluubta ku sugan laabta)

Sidaas awgeed qur'aanka wuxuu kor u qaaday qiimaha cilmiga, wuxuu ku tilmaamay inuu yahay suldaan, wuxuu yiri:

{الَّذِينَ يُجَادِلُونَ فِي آيَاتِ اللَّهِ بِغَيْرِ سُلْطَانٍ أَتَاهُمْ كَبْرَ مَقْتًا عِنْدَ اللَّهِ وَعِنْدَ الَّذِينَ آمَنُوا}

(Kuwa ku doodaya aayaadka Ilaahay xujo u timid la'aanteed waxaa ku waynaatay cadho Alle agtiisa iyo kuwa rumeeyay)

Wuxuu caddeeyay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - heerka aqoonta iyo fadliga raadinteeda, wuxuu yiri:

(مَنْ سَلَكَ طَرِيقًا يَطْلُبُ فِيهِ عِلْمًا ، سَلَكَ اللَّهُ بِهِ طَرِيقًا مِنْ طُرُقِ الْجَنَّةِ ، وَإِنَّ الْمَلَائِكَةَ لَتَضَعُ أَجْنِحَتَهَا رِضًا لِطَالِبِ الْعِلْمِ ، وَإِنَّ الْعَالِمَ لَيَسْتَعْفِرُ لَهُ مَنْ فِي السَّمَوَاتِ وَمَنْ فِي الْأَرْضِ ، وَالْحَيَّتَانُ فِي جَوْفِ الْمَاءِ ، وَإِنَّ فَضْلَ الْعَالِمِ عَلَى الْعَايِدِ كَفَضْلِ الْقَمَرِ لَيْلَةَ الْبَدْرِ عَلَى سَائِرِ الْكَوَاكِبِ ، وَإِنَّ الْعُلَمَاءَ وَرَثَةُ الْأَنْبِيَاءِ ، وَإِنَّ الْأَنْبِيَاءَ لَمْ يُورَثُوا دِينَارًا وَلَا دِرْهَمًا ، وَرَثُوا الْعِلْمَ ، فَمَنْ أَخَذَهُ أَخَذَ بِحِظِّ وَافِرٍ)

(Qofkii qaado jid uu cilmi ku raadinayo, Ilaahay wuxuu galinayaa jid ka mid ah jidadka jannada, malaa'igta waxay u dhigayaan garbhooda qofka cilmiga raadinaya iyagoo raalli ka ah, siduu uga fadli badan yahay caalimka caabidka waa sida uu uga fadli badan yahay dayaxa habeenka uu dhammeystiran yahay xiddigaha oo kale, culimada waa kuwa dhaxalo anbiyada, anbiyada ma aysan dhaxalsiin Diinaar ama Dirham waxay dhaxalsiiyeen aqoon, qofka qaato wuxuu qaatay sed badan).

وَعَنْ أَبِي ذَرٍّ (رضي الله عنه) قَالَ: قَالَ لِي رَسُولُ اللَّهِ (صلى الله عليه وسلم): (يَا أَبَا ذَرٍّ، لَأَنْ تَعُدَّوْ فَتَعَلَّمَ آيَةً مِنْ كِتَابِ اللَّهِ خَيْرٌ لَكَ مِنْ أَنْ تُصَلِّيَ مِائَةَ رَكْعَةٍ، وَلَأَنْ تَعُدَّوْ فَتَعَلَّمَ بِأَبَا مِنَ الْعِلْمِ - عَمِلَ بِهِ أَوْ لَمْ يُعْمَلْ - خَيْرٌ مِنْ أَنْ تُصَلِّيَ أَلْفَ رَكْعَةٍ)

Waxaa laga wariyay Abuu Thar- Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri: wuxuu igu yiri rasuulka Ilaahay - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -: (Abu Tharow, inaad kalahdo oo aad soo barato aayad ka tirsan kitaabka Ilaahay ayaa kaaga khayr badan inaad tukato boqol rakac, inaad kalahdo oo aad soo barato qeyb ka mid ah cilmiga - halgu camalfalo ama yaan

lagu camalfalin - ayaa kaaga khayr badan inaad tukato kun rakac)

Wuxuu leeyahay Imaam Cali –Ilaahay raalli haka noqdee-:

(الْعِلْمُ خَيْرٌ مِنَ الْمَالِ ؛ الْعِلْمُ يَحْرُسُكَ وَأَنْتَ تَحْرُسُ الْمَالَ ، وَالْعِلْمُ

حَاكِمٌ وَالْمَالُ مَحْكُومٌ ، وَالْمَالُ يُنْقِصُهُ النَّفَقَةُ ، وَالْعِلْمُ يَزِيدُكَ بِالْإِنْفَاقِ) .

(Cilmiga wuxuu ka fiican yahay hantida, cilmiga wuu ku ilaalinayaa, hantidana adigaa ilaaliyo, cilmiga waa taliye hantidana waa loo taliyaa, hantida waxay ku naaqustaa waxbixinta, cilmigana waxbixinta ayuu ku kordhaa)

Cilmiga wuxuu leeyahay akhlaaq sare iyo aadaab wanaagsan, ay habboon tahay inuu qaato ardayga iyo macallinkaba waxaa ugu muhimsan:

Ilaahay in loo barax tiro, waxaa laga rabaa macallinka iyo kan waxbaranaya inay Ilaahay wejigiisa ku raadiyaan oo ay iska jiraan istus iyo halagaa sheego, cilmiga wuxuu leeyahay shahwo qarsoon, haddii qalbiga addoonka ay ka adkaato waxaa ka xoog badinaya jacaylka muuqashada iyo caannimo raadiska iyo jacaylka hor iskeenidda, taas waxaa laga yaabaa inay saameeyso dhaqanka markaas uu dadka iska sarreysiyo, wuxuu nooga digay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - arrinkaas oo dhan, wuxuu yiri:

(مَنْ طَلَبَ الْعِلْمَ لِيُمَارِيَ بِهِ السُّفَهَاءَ، أَوْ لِيُبَاهِيَ بِهِ الْعُلَمَاءَ، أَوْ لِيَصْرِفَ وُجُوهَ النَّاسِ إِلَيْهِ، فَهُوَ فِي النَّارِ).

(Qofkii raadiyo cilmi siduu ugula doodo caqlilaaweyaasha ama siduu ugu faano culimada ama siduu dadka isugu soo jeediyo naarta ayuu galayaa)

Waxaa ka mid ah: tawaaduca, wuxuu u qoray Maalik – Ilaahay ha u naxariistee - Arrashiid: (haddii aad barato cilmi halagaa arko raadkiisa iyo deganaantiisa iyo hay'ddiisa iyo dulqaadkiisa)

Sidaa awgeed wuxuu yiri sayidkeena Cumar – Ilaahay raalli haka noqdee -:

(تَعَلَّمُوا الْعِلْمَ ، وَتَعَلَّمُوا لَهُ السَّكِينَةَ وَالْوَقَارَ)

(Barta cilmiga una barta xasilloonida iyo deganaanshaha)

Illeen cilmiga lama soconayo islaweynida, layskuma siiyo macsida waxaa laysku siiyaa raadintiisa wuxuuna ku kordhaa taqwada, wuxuu leeyahay Alle - subxaanahu -:

{وَاتَّقُوا اللَّهَ وَيُعَلِّمُكُمُ اللَّهُ وَاللَّهُ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ}

(Alle ka cabsada, Alle ayaa idin baraya, Allana waa kan og wax walba)

Waxay yiraahdeen: (qofkii ku camalfalo wuxuu bartay Alle ayaa baraya wax uusan ogeyn), camalka wuxuu shardi u yahay in la helo cilmiga rabbaaniga xagga Alle ka imaanayo, wuxuu leeyahay Alle markuu ka hadlayay addoonkii suubanaa suuratu Alkahf:

{فَوَجَدَا عَبْدًا مِنْ عِبَادِنَا آتَيْنَاهُ رَحْمَةً مِنْ عِنْدِنَا وَعَلَّمْنَاهُ مِنْ لَدُنَّا
عِلْمًا}

(Waxayna ka heleen addoon ka mid ah addoomadeena oon siinay naxariis agteena ka ahaatay oo aan barnay cilmi xaggeena ka haaday), wuxuu leeyahay Alle:

{فَفَهَّمْنَاهَا سُلَيْمَانَ وَكُلًّا آتَيْنَاهَا حُكْمًا وَعِلْمًا}

(Waxaanna fahansiinnay sulaymaan, dhammaanna waxaan siinay xukun iyo cilmi), Wuxuu leeyahay Alle asoo ka hadlaya sayidnaa Yaxya – nabadgelyo korkiisa ha haaatee -:

{يَا يَحْيَى خُذِ الْكِتَابَ بِقُوَّةٍ وَآتَيْنَاهُ الْحُكْمَ صَبِيًّا * وَحَنَانًا مِّن لَّدُنَّا
وَزَكَاةً وَكَانَ تَقِيًّا}

(Yaxyow ku qaado kitaabka xoog (dadaal) waxaan siinnay xigmo isagoo yar * iyo naxariis agtanada ka ahaatay iyo daahirnimo wuxuuna ahaa dhawrsade), wuxuu leeyahay Alle – subxaanahu -asoo ka hadlayo malaa'igta:

{سُبْحَانَكَ لَا عِلْمَ لَنَا إِلَّا مَا عَلَّمْتَنَا}

(Nasahnidaada Allow, cilmi ma lihin waxaad na barto mooyee)

Waxaa ka mid ah: in xasilloonida lagu sifeysanaado, illeen cilmiga wuxuu wataa quruxdiisa iyo haybaddiisa iyo weynidiisa, taasna waxaa astaan u ah, in lagu dadaalo muuqaalka fiican iyo nadaafadda iyo carafta iyo in laga fogaado meelaha hadalka macnadarada, wuxuu leeyahay rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

{إِنَّ الْهَدْيَ الصَّالِحَ، وَالسَّمْتَ الصَّالِحَ، وَالْاِقْتِصَادَ، جُزْءٌ مِنْ خَمْسَةٍ وَعِشْرِينَ جُزْءًا مِنَ النَّبُوءَةِ}

(Hanuunka suuban iyo qaabka wanaagsan iyo dhaqaalaysashada waa qeyb ka mid ah shan iyo labaatan qeybood nabinimada ka mid ah), caalimka qofka wax weyddiinayo wuxuu u yahay dhakhtarka siduu u yahay qofka bukan, waxaa lagama maarmaan ah

inuu u turo, inuu u kaxeeyo jidka toosan una caddeeyo waddada saxan

عَنْ مُعَاوِيَةَ بْنِ الْحَكَمِ ، قَالَ : "بَيْنَمَا أَنَا أُصَلِّي مَعَ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِذْ عَطَسَ رَجُلٌ مِنَ الْقَوْمِ فَقُلْتُ : يَرْحَمُكَ اللَّهُ ، فَرَمَانِي الْقَوْمُ بِأَبْصَارِهِمْ ، فَقُلْتُ : وَانْكَلَ أُمَّاهُ ، مَا شَأْنُكُمْ تَنْظُرُونَ إِلَيَّ؟ فَجَعَلُوا يَضْرِبُونَ بِأَيْدِيهِمْ عَلَيَّ أَفْخَازِهِمْ فَلَمَّا رَأَيْتُهُمْ يُصَمِتُونِي سَكَتُ ، فَلَمَّا صَلَّى رَسُولُ اللَّهِ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) ، فَبِأَيِّ هُوَ وَأُمِّي ، مَا رَأَيْتُ مُعَلِّمًا قَبْلَهُ وَلَا بَعْدَهُ أَحْسَنَ تَعْلِيمًا مِنْهُ ، وَاللَّهِ مَا قَهَرَنِي وَلَا ضَرَبَنِي ، وَلَا شَتَمَنِي ."

Waxaa laga wariyay Mucaawiya bin Alxakam wuxuu yiri: "anoo la tukanaya nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee – waxaa handhisay nin dadka ka tirsan waxaan dhahay: Ilaahay hakuu naxariisto, dadkii ayaa indhaha igu soo kuuray, waxaan dhahay: ba'ayeey maxaa idinku dhacay oo aad sidan igu soo fiirinaysaan? Waxay bilaabeen inay gacmahooda ku garaacaan bawdadooda, markaan arkay inay i aammusinayaan waan aammusay, markuu tukaday rasuulka Ilaahay - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - hooyadey iyo aabbahay halagu furtee, ma arkin macallin ka fiican

hortiisa iyo gadaashiisaba xagga waxbaridda, wallaahi ma i dhibin mana i garaacin mana i caayin"

Sidoo kale waxaa jira arrimo loo baahan yahay ardayga inuu ku dhaqmo, waxaa ugu muhimsan: inuu ku dadaalo wax barashada oo uu daa'imo daal la'aan, waqtigiisana inuusan ku luminin waxaan wax u taraynin, waxaa la yiri: cilmiga kuma siinayo qeybtiisa ilaa aad ka siiso dhamaantaada, marka la weyddiiyay Imaam Shaafici - Ilaahay ha u naxariistee -: siduu yahay jacaylkaaga cilmiga? wuxuu yiri: kalmadda ayaan ka maqlayaa waxaan maqlin, xubnahayga waxay jeclaanayaan inay lahaadaan maqal oo ku raaxaysanaya sidey dhegta ugu raaxaystay, waxaa lagu yiri: sideed ugu dadaashaa? wuxuu yiri: siduu ugu dadaalo hantida bakhaylka markuu gaaro macaanka hantida, waxaa lagu yiri: sideed u raadisaa? wuxuu yiri: sidey u raadiso haweeneyda ilmaha ka lumeen oon haysanin ilmo kale,

* Weyneynta macallinka iyo tixgalintiisa: qofka macallinkiisa ma aha inuu hadal kulul ku dhaho ama fal kulul la hortago, wuxuu yiri Imaam Shaafici: waxaan ugu geddin jiray Maalik hortiisa bogga si aayar ah anoo isaga ka haybaysanayo siduusan u maqlin dhawaaqiisa, wuxuu

yiri Rabiic – Ilaahay ha u naxariistee -: wallaahi waligay kuma dhiirranin inaan biyo cabbo shaafici oo isoo fiirinaya haybo awgeed, maxaa ka fiican markuu showqi yiri:

قُمْ لِلْمُعَلِّمِ وَفِيهِ التَّبَجُّيلَ * كَادَ الْمُعَلِّمُ أَنْ يَكُونَ رَسُولًا

**U istaag macallinka weyneyntiisana sii *
Macallinka wuxuu ku sigtay inuu rasuul noqdo**

Waxaan shaki ku jirin inaan aad ugu baahan nahay inaan helno dhmmaam culuumta aan ku dhiseyno adduunkeena si aan ugu baahan nahay culuumta diinteena ay ku tooseyso, ma haysano dheregdhacsi xagga waqtiga, maxaayeelay cilmibaarista iyo halabuurista waxay noqdeen waxa hadda laynaga rabo, waxaa laga yaabaa inaan haleelno socdaalka ama aan gaarno wixii na dhaafay, mid kaste naga mid ah waa inuu halabuur lahaado iyo tartan iyo yiddidiilo, markay ugu yar tahay waa inaan raadinaa sidaan ummadda ugu celin lahayn samanka dadkii waaweynaa ee aabbayaasheena iyo awooweyaasheena, kuwaasoo cilmiga u safray kuna dadaalay sidey u heli laahaayeen ilaa ay ka gaareen meel sare oo ay noqdaan kuwa caan ku ah qeybaha cilmiga oo dhan, taasoo u noqotay il saafi

ah iyo feynuus ummadaha oo dhan iyo xadaarooyinka gadaashooda soo baxay, shicaarkeenana wuxuu ahaa:

نَبِيٍّ كَمَا كَانَتْ أَوَائِلُنَا * تَبْنِي ، وَنَفْعٌ مِثْلَمَا فَعَلُوا

**Waxaan u dhiseynaa sidey u dhisi jireen * dadkeeni hore
waxaanna sameynaynaa waxay sameeyeen**

Waxaa lagama maarmaan ah caalimka iyo ardayga inay ku dhaqmaan akhlaaqda wanaagsan, waa inuu islahado hadalkooda iyo falkooda ilaa taas ay ka saameyso bulshada, ummadda markay isku xirtay cilmiga iyo camalka iyo akhlaaqda waxay ugu noolaatay sharaf iyo cisi ummadaha dhexdooda, markii la helay akhlaaqda iyo cilmiga waxaa la halay horumar iyo barwaaqo.

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay
ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha haato midka lagu khatimay anbiyada iyo mursaliinta oo ah sayidkeena Muxamed isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo dadkii wanaag kuraacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Walaalaha islaamka ahow:

Islaamka wuxuu kor u qaaday cilmiga iyo culimada iyadoo leh takhasusyo kala duwan, cilmiga waxtarka leh waxaa soo galaya dhammaan culuumta dadka wax u tarayso xagga diintooda iyo adduunkoodaba, sidaa awgeed waxaan u arkaynaa oraahda Alle:

{إِنَّمَا يَخْشَى اللَّهَ مِنْ عِبَادِهِ الْعُلَمَاءُ}

(Alle waxaa uun ka baqa addoomihiisa culimada)

Inay kusoo aroortay marka laga hadlayay culuumta koonka, wuxuu leeyahay Alle:

{أَلَمْ تَرَ أَنَّ اللَّهَ أَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَخْرَجْنَا بِهِ ثَمَرَاتٍ مُخْتَلِفًا
أَلْوَانُهَا وَمِنَ الْجِبَالِ جُدَدٌ بَيضٌ وَحُمْرٌ مُخْتَلِفٌ أَلْوَانُهَا وَغَرَابِيبُ سُودٌ
* وَمِنَ النَّاسِ وَالدَّوَابِّ وَأَلْأَنْعَامِ مُخْتَلِفٌ أَلْوَانُهُ كَذَلِكَ إِنَّمَا يَخْشَى
اللَّهَ مِنْ عِبَادِهِ الْعُلَمَاءُ إِنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ غَفُورٌ}

(Miyaadan arkayn in Alle ka soo dejiyay cirka biyo markaasna aan ku soo bixinnay miro kala duwan midabkoodu, buurahana waxaa ka mid ah waddooyin cad cad, iyo kuwo gaduud ah oo midabo kala duwan leh iyo kuwo madow daran ah * dadka iyo dhulsoctada iyo xoolahaba waxaa ka mid ah midabo

kala duwan saas oo kale Alle waxaa uun ka baqa addoomihiisa culimada Allanaha waa mid ciso leh oo dambidhaaf badan), wuxuu leeyahay Alle:

{إِنَّ فِي خَلْقِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَاخْتِلَافِ اللَّيْلِ وَالنَّهَارِ لآيَاتٍ لِأُولِي الْأَبْصَارِ * الَّذِينَ يَذْكُرُونَ اللَّهَ قِيَامًا وَقُعُودًا وَعَلَىٰ جُنُوبِهِمْ وَيَتَفَكَّرُونَ فِي خَلْقِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ}.

(Abuuridda cirirka iyo dhulka iyo is khilaafidda habeenka iyo maalinta calaamooyin ayaa ugu sugan kuwa caqliga leh * ee ah kuwa ku xusa Alle taagni iyo fadhi iyo jiifba, oo ku fikira abuuridda cirirka iyo dhulka (iyagoo dhihi) rabbiyow umaadan abuurin kan baadil (ciyaar) waad nasahan tahay ee naga kori cadaabka naarta)

Sidoo kale waxaa laga wadaa cilmiga waxtarka leh wax kastoo dadka wax u taraya adduunkooda iyo aakhiradoodaba, culuumta sharciga iyo carabiga iyo caafimaadka iyo farmashiyada iyo fiisigiska iyo kimistariga falagga ama handasada iyo tamarta dhammaan culuumta, cilmiga waa asaaska shakhsiyadda wadaniyadda halbauerka leh, taas waxaa daliil u ah oraahda Alle:

{فَاسْأَلُوا أَهْلَ الذِّكْرِ إِنْ كُنْتُمْ لَا تَعْلَمُونَ}

(Ee warsada kuwa cilmiga leh haddaydaan wax ogayn), kalmadda dikriga waxay tusinaysaa aqoonta guud ahaan, cilmi kaste ayaa soo galaya, waxaan shaki ku jirin inaan u baahan nahay inaan helno dhmmaan culuumta aan ku dhiseyno adduunkeena si aan ugu baahan nahay culuumta diinteena ay ku tooseyso.

Waxa laga rabo waqtigan xaadirka ah culimada waa inay saxaan fahanka qaldan iyagoo saxaya suuradda qaldan ee laga haysto islaamka iyo muslimiinta, inay ka shaqeeyaan faafinta fikirka islaamiga saxa ah, Ilaahay waxaan weyddiisanaynaa inaan ka mid noqono kuwa lagu kalsoon yahay iyo inuu na baro waxaan jaahil ka nahay iyo inuu na xusuusiyo waxaan illownay iyo inuu arrinkeena ka dhigo mid toosan